

Dugsiga Sare ee St. Louis Park **Siyaasada Xeerka Labiska**

Bulshada Dugsiga Sare ee St. Louis Park waxay ka filanayaan qof walba in ay isu muujiyaan ixtiraam uu ku jiro kuna haboon dugsiyada dadweynaha. Dharka iskuulka lagu labisto waa in aysan noqon kuwo la dhibsado ama yax yax ku abuuri kara dadka labisan ama uusan noqon mid caafimaadka dhib u keeni kara. Dharka la labisto waa in aysan carqaladayn jirka ardayga ama habsami u socodka waxbarashada. Dharka iyo is qurxun ardayga waxay noqon karaan kuwa maamulka iskuulka daneeyo haddii ay carqalad ku noqdaan barnaamijka waxbarasho ama uu noqdo mid la dhibsado ama mid aan u haboonayn dadka kale. Ardayda waa inay u labistaan hab ay maskaxdooda ay ku haayaan bee'ada waxbarasho, nabadgelyo, caafimaad iyo daryeelka dadka kale.

- Koofiyadaha foodda leh, madax gashiga jaakada ku dhegan, marada madaxa lagu xirto, koofiyada lafta madaxa la geliyo (koofiyad madaxa la gashado oo xaddideysa in la garto ardayga) waa in lagu hayaa sanduuqa ardayga
- Dhamaan jaakadaha/jaakadaha waa weyn oo loogu talagaley in kor looga labisto (ayna ku jiraan jaakadaha nooca dhalaalaya oo xariirta ka sameysan, jaakadaha xarfaha ku qoran, jaakadaha maqaarka ka sameysan, jaakadaha jeebabka badan leh, jaakadaha waaweyn ee qabayga iwm) waa in lagu hayaa sanduuqa ardayga
- Dhamaan ardayda waa in ay kabo labistaan
- Goonooyinka, surwaal dabagaabka iyo dharka labiska (ayna ku jiraan kuwa dhinaca ka furan) waa in ay gaarsiisanaadaa kalabarka cajarka/bowdada
- Canbuurada aan gacmaha lahayn waa la ogol yahay maadaama aysan; habadka ka furnayn (lab iyo neddig-ba), xuddun banayska lama ogola (dhar gaaban oo kor laga soo gashado oo soo muujiya caloosha iyo/ama xuddunta caloosha), dharka gadaal ka furan lama ogola (dhexda ilaa iyo xaga hoose). Dharka la xirto waa in uu suun lahaadaa.
- Dharka lagashado waa in ay caafimaad ahaan nadiif u ahaadaan
- Dharka hoos laga qaato waa in u daboolanaadaa
- Lama ogola dharka ay ku qoran yihiin erayo ama sawir oo fuxshi ku tusaya, ciyaal suuqnimo ay ku jirto, galmo waadix ah, gudbinaya wax galmo la xiriira oo maldahan, dhibaateyn ama midabtakoor, ama kuwo gacan ka geysanaya ama xayasiiya aalkolo, wax kiimiko ah, tubaako ama iyo wax kasta oo la soo saaro oo isticmaalkooda aan loo ogalayn carruurta yar yar.
- Dharka iyo waxa kale ama is qurxinta oo muujinaya iyo/ama hab gacan ka geysanaya handadaad/naceyb koox ama burcadnimo lama ogola
- Katiinadaha birta ka sameysan iyo mujowharaadka (waxa la isku qurxiyo) ama waxa la isku sharaxo waxaa lagu tiriyaa wax ilaalintooda la daneeyo lamina keeni karo iskuulka mana lasoo xiran karo marka iskuulka la imaanaayo

Ardaygii jebiya xeer labiska waxaa loo sheegi doonaa in uu is daboolo (Iskuulka waxaa u diyaar noqonaya xoogahaa fanaanado gacma gaab ah) ama in gurigooda loo diro si uu isaga soo bedelo. Haddii ardayga uu doorto inuu guriga uu aado si uu isaga soo bedelo, waa in waalidka lala xiriiraa. Ardayga waa in uu soo saxiixaa Xafiiska Ardayda marka uu soo laabanaayo maalintaas.